



## Department of Families, Fairness and Housing

GPO Box 1774  
Melbourne Victoria 3001  
Telephone: +61 3 9096 0301  
[www.dffh.vic.gov.au](http://www.dffh.vic.gov.au)

Somali | Soomaali

### **Isbeddel lagu sameynayo Xafiiska Guryaha ee North Melbourne**

Mudanaha/Marwadada guriga degan,

Waxaan qoraalkan kuugu soo diraynaa inaan kula socodsiino isbeddel muhiim ah oo ku yimid sida aad u heli karto adeegyada shaqsiga ah ee Xafiiska Guryaha ee North Melbourne.

#### **Laga bilaabo Arbacada 21-ka bisha Janaayo 2026**

Fadlan ballan hore usii qabso haddii aad rabto inaad si shaqsi ah ula kulanto Howlwadeenka Guryaha ee ka howlgala Xafiiska Guryaha ee North Melbourne.

#### **Sidee ula xiriiri kartaa kooxdeena**

- Waxaad sii wadi kartaa inaad wacdo ama aad iimayl u dirto Howlwadeenka Guryaha ee ka howlgala North Melbourne sida caadiga ah
- Waxaad ballan shaqsi ah ka qabsan kartaa North Melbourne adigoo wacaya ama iimayl u diraya kooxdeena.

Wixii ka dambeeya 21-ka bisha Janaayo ma jiri doonto booqasho lagu imaanayo xafiiska North Melbourne ayadoon ballan hore loo sii qabsan.

#### **Maxaa keenay isbedelkan?**

Laga bilaabo 21-ka bisha Janaayo, kooxda Guryaha ee North Melbourne waxay u guurayaan **Xafiiska Guryaha ee Ascot Vale**, sababo la xiriira dib-u-dhiska lagu sameynayo 33 Alfred Street si loo bixiyo guryo ka tiro badan kana tayo sareeya kuwii hore.

Kooxdeena waxay wali diyaar u yihiin inay ku caawiyaan, waxaadna kula xiriiri kartaa taleefan ama iimayl sidii caadiga ahayd.

**Taageerada la bixiyo ayadoon wax ballan ah hore loo sii qabsan ayaa laga heli karaa Ascot Vale**

Haddii aad rabto inaad qof si shaqsi ah ula hadasho, adigoon ballan qabsan, waxaad booqan kartaa Xafiiska Guryaha ee Ascot Vale ee ku yaal 12 Churchill Avenue, Ascot Vale. Saacadaha ay furan yihiin: Isniinta ilaa Jimcaha, 8:45 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo.

**Ballan inaad ka qabsato North Melbourne**

Haddii aadan imaan karin xafiiska Ascot Vale ama aad u baahan tahay in lagugula kulmo North Melbourne, fadlan **la xiriir Howlwadeenkaaga Guryaha si aad ballan u qabsato** laga bilaabo 21-ka bisha Janaayo 2026.

**Su'aalo**

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, fadlan la xiriir Howlwadeenkaaga Guryaha ama wac 1300 360 462.

Mahadsanid

Belinda Dorian,  
Ku simaha Maareeyaha, Taageerada Macaamiisha iyo Adeegyada Guryaha  
Qeybta Galbeed  
1300 360 462